WARAR AF-SOOMAALI 8 Febraayo 2026 · 1 daqiiqo akhris ADC-N-2026-001-SO

ADC iyo Rakeeza LLC oo heshiis saxiixay, beeralleyna ku tababaray nafaqada dhirta

> **ADC iyo Rakeeza LLC, oo ah warshad bacrimin ka soo saarta Cumaan, ayaa saxiixay heshiis, waxayna 23 beeralley iyo tababarayaal ku tababareen nafaqada dhirta.**



Mohamed Dahir Abukar, Agaasimaha Guud ee ADC, iyo Abdullah Humaid Said Al Shereiqi oo ka socda Rakeeza LLC oo saxiixaya heshiis, iyadoo goobjoog ah Wasiirka Beeraha iyo Waraabka, Guddoomiyaha Rakeeza LLC, Guddoomiyaha ADC iyo lataliye ka tirsan ADC. Muqdisho, 8 Febraayo 2026.

Muqdisho, 8 Febraayo 2026 — Agro Development Company (ADC) iyo Rakeeza LLC, oo ah warshad bacrimin ka soo saarta Cumaan, ayaa 8 Febraayo 2026 saxiixay heshiis. Heshiiska waxaa ADC u saxiixay Mohamed Dahir Abukar, Rakeeza LLC-na waxaa u saxiixay Abdullah Humaid Said Al Shereiqi. Waxaa goobjoog ahaa Wasiirka Beeraha iyo Waraabka, Guddoomiyaha Rakeeza LLC, Guddoomiyaha ADC iyo lataliye ka tirsan ADC. Heshiisku wuxuu dhisayaa guddi wadaag ah oo kormeera fulinta, dib-u-eegisna ku sameeya horumarka saddexdii biloodba mar.

Maalin ka hor, 7 Febraayo 2026, ADC iyo Rakeeza waxay tababar farsamo oo ku saabsan macdanaha 'chelated' iyo nafaqada dhirta siiyeen 23 qof: 20 beeralley oo ka tirsan Qaybta Shabakadda Beeralleyda ee ADC iyo 3 tababarayaal, kuwaas oo tababarka u gudbin doona

beeralley kale. Tababarka waxaa hoggaaminayay Mudane Abdullah Humaid Said Al Shereiqi, Agaasimaha Guud ee Rakeeza LLC.

Rakeeza waxay soo saartaa bacriminta la shahaadeeyay ee ADC soo dejiso oo ay u qaybiso beeralleyda Soomaaliyeed.

KU SAABSAN ADC

Agro Development Company (ADC) waa shirkad Soomaaliyeed oo gaar loo leeyahay, kana shaqaysa agabka beeraha, abaabulka beeralleyda iyo fulinta barnaamijyada. ADC waxay bixisaa bacrimin la shahaadeeyay, waxay la shaqaysaa 3,000 beeralley oo diiwaangashan oo ku sugan Koonfur Galbeed iyo Hirshabeelle, waxayna La-hawlgalaha Fulinta Istaraatiijiga ah u tahay Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka ee Dowladda Federaalka. ADC waxay haysataa shahaadada ISO 9001:2015, waxayna ka diiwaangashan tahay Suuqa Caalamiga ah ee Qaramada Midoobay (UNGM No. 1221175).

Iska sawir si aad online ugu akhrido

Tixraac: Agro Development Company (ADC). “ADC iyo Rakeeza LLC oo heshiis saxiixay, beeralleyna ku tababaray nafaqada dhirta.” Warar, 8 Febraayo 2026. Ref. ADC-N-2026-001-SO. agrodev.so/news-publications/adc-rakeeza-agreement-farmer-training-so